

Talooyin Kooban

Afar Mabaadi' oo Muhiim ku ah Xanaanada Kuhaboon Da'da iyo Korinimada Caruurta Yar Yar oo Dhan

1. Kaqaybqaadashada aduunka kuma xirna awood ama itaal'laan. Wuxuu ku xiranyahay in lahelo fursad siman.



Hal aduun baa jira oo midkeen kasta qayb ka noqon karaa.

2. Inta lagu guda jiro sanadaha ugu horeeya nolosha carruurtu waxay dhistaan aragtidooda naftooda iyo aduunka ba.

Waxaa cunuga u samaysma aas aaska uu kula qabsanayo bay'adda, asxaab kusamaysanayo, aduunkana uu kulaqabsanayo guushiisa iyo caqabadihiisa.

3. Cunuga yarkaa dareenkiisa dhabta ah waxaa loo qaabeeyey iyada oo loo marayo khibradda ah in uu dadka wax laleeyahay iyo in uu dareemo aqbalid ama in uu dadka kamid yahay.

Caruurtu inta ay isaga egyihiin baa ka badan waxa ay ku kala duwanyihiin. Caruurta oo dhan waxay u qalmaan in ay helaan fursadaha ka qaybqaadashada khibradaha caadiga ah ee caruurnimada si uu u dareemo kana kobco dareenka in uu wax ku leeyahay bay'adda.

4. Xanaanada ku haboon da'da iyo korinimada caruurta yar yar oo dhan waxay tahay mid:

- Da'da ku haboon
- Meesha uu korinimada kajoogo mid kuhaboon
- Shaqsi ahaan ku haboon

Waxay tilmaamaysaa

- In laqadariyo kala duwanaanshaha dadka.
- Aqoon looyeesho cunuga shaqsiga ah iyo reerka uu ka dhashay.
- Aqoon loo yeesho qaabka uu shaqsi kasta wax ku barto.
- Cunuga oo dhan in xoogga lasaaro - meesha uu kaalito keliya aan xooga lasaarin.
- Qofkasta in ay arintaa wax tarayso.

Waxay taageertaa

- In latixgeliyo siyaabo kala duwan oo ilmaha lagusoo dhawaynayo.
- Caruurta intii wax isla qabankarta la isku keeno.
- Si qumman in la isugu saameeyo caruurta intaal la'aanta ah iyo kuwa aan ahayn: 10% caruur ah in ay ujiraan hal cunug oo itaal la'aan ah iyo 1% cunug oo itaal la'aan daran leh.
- In ay caruurtu wax iska bartaan.
- In la isla wadaago aqoonta iyo khibradda.

Wuxuu xoogga saaraya

- Caruurnimaduu xoogga saaraya ee xooga masaarayo itaal la'aanta.
- Dabacsanaan iyo in lamuujijo dabeeecad wanaagsan.
- Iskaashi xagga dadaalka iyo in uu jiro rabitaan.
- Bay'ad cunuga, ehelkiisa, shaqaalahaa caruurta xanaaneeyaa iyo kuwa takhasuska leh tageerta.
- Caruurta in loo ogolaado in ay lakulmaan caqabado.
- In lacadeeyo qofka hawshiisa iyo mas'uuliyadiisa.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo

www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa
ujeeddooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal
xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee
Minnesota.